Dulmarida tusaha isku qorida iyo ka codbixinta Fiktooriya

Sida Fiktooriya loo xakumaa way saamaysaa nolol maalmeedkaaga. Waxaad caawima ka gaysan kartaa qaabaynta Fiktooriya adoo is qoraya codkana bixinaya.

Isku qorida doorashada

Isku qorida codbixintu waa muhiim sababtoo ah waxay kuu ogolaataa inaad cod ku yeellato qofka kuu matalaya Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo golaha degaanka. Heer walba oo dawladeed waxay leedahay masuuliyad laga yaabo inay saamayso adiga iyo bulshadaada.

Si aad uga codbixiso Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo Golaha Degaanka waxaa waajib kugu ah inaad si fiican isugu qorto Liiska codbixinta. Liiska codbixintu waa liiska ay ku qoran yihiin magacyada dadka codbixinaya iyo cinwaanadooda.

Sidee isugu qoraa?
Isku qoridu waa sahlan tahay, waxaadna u baahan tahay inaad hal mar isqorto si aad uga codbixiso doorashooyinka Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo Golaha degaanka.

Waxaad u baahan tahay waa inaad buuxiso soona celiso foomka isku qorida oo laga hello websaytka Golaha Doorashada Fiktooriya.

Waxaa kaloo laga helli karaa boostada, Dukaanka Coles ama Bi-Lo, ama xafiiska Golaha Doorashada Fiktooriya. Waxaad kaloo codsan kartaa in boostada laguu soo dhigo adoo wacaya **13 18 32** ama nambarka **9209 0108** haddaad u baahan tahay mutarjum.

Ma inaan is qoraa?
Haa. Waa khasab in la is qoro haddii aad tahay:

- Muwaadin Australiyaan ah;
- Aad jirto 18 sanadood ama ka weyn; aadna
- Ku nooshahay cinwaankaaga hadda ah ee Fiktooriya ugu yaraan hal bil.

Isku qorid khaasa

Foomamka isku qorida khaaska ah ee xaalladaha hoos ku qoran ayaa laga helli karaa websaytka Golaha Doorashada Fiktooriya, ama adoo wacaya Golaha Doorashada Fiktooriya oo ah **13 18 32** ama nambarka **9209 0108** haddaad u baahna tahay mutarjum.

Maxaa dhacaya haddii aanan tegi karin xarunta codbixinta?

Waxaad isku qori kartaa codbixiye boosta ku soo dira haddii aad dhibaato ku qabto inaad timaado xarunta codbixinta maalinta doorashada. Waxaad dalban kartaa inaad noqoto qof codka ku bixiya boostada haddii aad:

- Ku nooshahay meel 20 Km u jirta xarunta codbixinta;
- Aad jirto 70 sano ama ka weyn*;
- Aad leedahay iin;
- Qabto iin caafimaad;
- Aad hayso qof qaba dhibaato caafimaad;
- Aad ugu qoran tahay cod bixiye aamusan ahaan;
- Aad xiran tahay in ka yar saddex sano; ama
- Aaminaad diimeed oo kuu diidaysa inaad cod bixinta aado maalinta doorashada.

* doorashada dawlad goboleedka iyo doorashada golayaasha keliya

Haddii aad ku qoran tahay inaad boosta codbixinta ku soo dirto, waxaa laguu soo diri doonaa warqadaha ka dib magacaabida musharaxa tartanka doorashada dhow.

Maxaa dhacaya haddii aan ku noolahay dibada ama safrayo?

Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad isk aqorto cod bixiye banaanka jooga ahaan haddii aad:

- Ku qoran tahay aadna doonayso inaad ka baxdo wadanka saddexda bilood oo socota, aadna doonayso inaad soo noqoto saddex sano gudahood; ama
- Aad iska qortay Australia aadna ka tagtay Australia in ka yar saddex sano gudahood, aadna doonayso inaad ku soo noqoto Australia lix sano ka dib markaad dhooftay.

Isku qorida qof banaanka cod ka bixinayey ahaan doortaha maaha in laga isaga soo dirayo warqadaha codbixinta. Weli waa inaad codka u bixisaa ama qof ahaan tagtaa safaarada Australia dibada ku leedahay taas oo bixisa adeeg qunsiliyadeed oo buuxa, ama aad dalbataa in boostada laguu soo dhigo.

Maxaa dhacaya haddii aanan doonayn in cinwaankaygu ka muuqdo liiska codbixinta sababa amaan dartood?

Waxaad dalban kartaa inaad isku qorto habka liiska aamusan haddii aad aaminsan tahay in magacaaga oo lagu qoraa liiska uu amaankaaga ama kan qoyskaaga waxyeellayo. Liiska isku qorida oo aamusan, macnihiisu waa cinwaankaaga lagama muujinayo liiska codbixinta.

Maxaa dhacaya haddii aanan guri lahayn ama haysan lahayn cinwaan rasmi ah?
Waxaad dalban kartaa inaad isku qorto doorte aan cinwaan lahayn ahaan haddii aadan lahayn cinwaan rasmi ah.

Iska qorida doorashooyinka golayaasha

Ma inaan is qoraa si aan codka u bixiyo?
Waxaa si awtomaatik ah laguugu qori doonaa golayaasha doorashada haddii:

- Aad ku qoran tahay doorashada Dawlad Goboleedka iyo Doorashada dawlada Dhexe cinwaankaaga hadda ah; ama
- Aad leedahay hanti ku jirta dawlada hoose halka doorashooyinka lagu qabanayo laakiin aadan ku noolayn gurigaas aadna tahay qofka kowaad ama labaad oo ku qoran diiwaanka dawlada hoose; ama
- Aad dalbatay inaad isku qorto golaha doorashooyinka (arag).

Waxaa kaloo laga yaabaa inaad dalbato inaad isku qorto haddii aad ka weyn tahay 18 sanadood aadna:

- tahay qof aan haysan dhalshada Australia oo ku nool degaankaas bixiyana cashuurta dawlada hoose halka doorashada lagu qabanayo; ama
- Aad bixiso cashuurta guriga aad degan tahay aadana haysan xuquuqda codbixinta degmadaas doorashadu ka dhacayso, sida, kiraystaha dukaan, aadna ku qoran tahay diiwaanka cashuur bixinta golaha si aad u hesho ogeysiinta cashuur bixinta, ama ogolaasha qoran oo qofka leh codbixnta; ama
- Aad tahay agaasimaha ama xoghayaha shirkada bixisa cashuurta halka doorashooyinka lagu qabtay aanuna lahayn xaq kale oo codbixineed degmadaas dhexdeeda.

La xiriir golaha degmadaada haddii kuwa kor lagu soo sheegay aanay adiga ku khusayn.

Yaa arki kara macluumaadka isku qorida?

Guddiga Doorashada Fiktooriya waxay sameeyeen nadaam lagu ilaaliyo macluumaadka isku qorida iyo barayfasiga kuwa codka bixiya.

Xeerka 2002 ee Doorashada (Fiktooriya) wuxuu u baahan yahay Guddiga Doorashada Fiktooriya u ogolaan karaan macluumaadka qaarkiis kuwa lugta ku leh sida xisbiyada siyaasada, xubnaha baarlamaanka iyo musharaxiinta.

Xeerka Doorashadu wuxuu kaloo u ogolaanayaa in guddiga Doorashada Fiktooriya siiyaan macluumaadka shakhsiyaadka qaarkood ama ururada.

Tani way dhici kartaa haddii, xaallada la qadimay, tahay danta dadka guud in la bixiyo macluumaadkaas, taas oo ka weyn barayfasiga macluumaadka qofka gaarka ah.

Shakhsiyaadka iyo ururada la siiyey macluumaadka dadka liiska doorashada ku jira waxay ku qoran yihiin websaytka Guddiga Doorashada Fiktooriya. Codbixiyayaasha aan doonayn in faahfaahintoodu ka muuqato liiska sababa amaan dartood waxaa laga yaabaa inay isku qoran liiska aamusan.

Codbixinta doorashooyinka

Haddii aad ku qoran tahay in aad codbixiso, waa inaad codka ka bixisaa dhamaan doorashooyinka Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo dawladaha hoose. Haddii aad codbixin weydo sabab macquul laáantood, waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo. Codbixiyaha aan deganayn iyo dadka ka weyn 70 sano ayaa laga saaray inay codka ka bixiyaan doorashooyinka golayaasha degaanka.

Doorashada Dawlada Dhexe

Dawlada Dhexe doorashadeeda badanaa waxaa la qabtaa Sabtida si madax banaan ayaana waxaa u sameeya Guddiga Doorashada Australia.

Baarlamaanka Dawlada Dhexe ee Australia wuxuu ka kooban yahay laba aqal oo kala ah Aqalka Baarlamaanka – Aqalka Wakiilada (oo loo yaqaan Aqalka Hoose) iyo Odayaasha (Aqalka Sarre).

Yaan dooranayaa?

Doorahsada baarlamaanka waxaad dooranaysaa dadka kuu matala Aqalka Wakiilada iyo Aqalka Odayaasha.

Australia waxaa loo qaybiyey 150 qaybood oo ah aqalka wakiilada. Kuwaas Fiktooriya waxay ka doorataa 37 mudane oo haynaya ilaa saddex sano.

Doorasha kasta oo Dawlad Dhexe, codbixiyayaasha reer Fiktooriya waxay kaloo u doortaan lix ka mid ah 12ka Oday (senators) inay ahaadaan xubnaha baarlamaanka ee aqalka odayaasha muddo lix sano ah.

Doorashada Dawlad Goboleedka

Doorashooyinka Dawlad Goboleedka waxa la qabtaa afartii sanaba hal mar Sabtida ugu dambaysa bisha Nufeembar waxaana si madaxbanaan u qaada Guddiga Doorashooyinka Fiktooriya. Doorashada soo socota ee Dawlad Goboleedku waxay dhacaysaa sabtida, 25ka Nufembar 2006.

Baarlamaanka Fiktooriya waxaa loo qaybiyaa 88 xubnood oo sharci sameeyayaal degmooyin (ama Aqalka Hoose). Doorashada Soo socota ee Dawlad Goboleedka, Fiktooriya waxaa loo sii qaybin doonaa sideed Gole oo sharci samayayaal gobol (ama Aqalka Hoose) ee Qaybaha.

Yaan dooranaya?
Waxaad u codaynaysaa doorashada Dawlad Goboleedka si aad u doorato hal qof oo kuu matala Kulanka sharci dejinta iyo shan qof oo kuu matala Golaha sharci Dejinta. Wakiiladaani waxay adeegan muddo afar sano ah.

Doorashooyinka Golaha Degaanka
Laga bilaabo 2008, doorashooyinka golaha degaanka ee Fiktooriya xubnahooda degaanka ee dhan waxaa la qaban doonaa afartii sanaba hal mar.

Konton iyo afar gole degaan ayaa qaban doona doorasho Nufembarta 2005. Sanada 2008, dhamaan doorashooyinka golaha waxaa la qaban doonaa Sabtida ugu dambaysa Nufembar. Intaas ka dib, waxaa la qaban doonaa afartii sanaba hal mar Sabtida ugu dambaysa Nufembar.

Yaa dooranayaa?
Waxaad codka siinaysaa golayaasha Degmada si aad u doorato musharax ama musharaxiinta xaafadaada si ay kuugu matalaan golaha degaanka mudda afar sano ah. Degmada Melbourne, Waxaad kaloo si toos ah cod u siinaysaa Duqa magaalada iyo ku xigeenkiisa.

Degmooyinka qaarkood Fiktooriya waa in loo sii kala qaybiyaa (goob weyn oo doorasho). Kuwa kale waxaa loo sii kala qaybiyaa waaxyo (dhowr goobooy oo yaryar ee doorasho). Nambarka xubnaha golayaasha, iyo qaabka doorashada golaha waxaa goáamiya Wasiirka Dawladaha Hoose.

Madoonaysaa inaad intaas ka badan ogaato?

Haddii aad caawima u baahan tahay aadna jeclaan lahayd muatarjum aadna rabto inaad ogaato waxyaalla ku saabsan isku qorida liiska codbixinta ee Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo Golah adegaanka, wac **9209 0108**.

Haddii kale, nagala xiriir:

Victorian Electoral Commission
Level 8, 505 Little Collins Street
Melbourne Victoria 3000

Ama naga soo wac 13 18 32
+61 3 9299 0520 (wixii Australia ka baxsan)
9299 0570 telefoonka erayada (dadka aan wax maqal)

Haddii aad jeclaan lahayd inaad magacawdo wakiilada Aqalka ama Sanitka Doorashada Dawlada Dhexe, wac Guddiga Doorashada Australia 13 23 26 ama booqo visit www.aec.gov.au

Musharxiinta aqalka hoose doorashooyinka Dawlad goboleedka, ama wixii khuseeya doorashooyinka golayaasha degmada la xiriir Guddiga Doorashooyinka Fiktooriya.